

Biomüll -Qashinka dabiiciga ah

Qashinka dabiiciga ah waxaa loo isticmaalay in lagu sameeyo koronto, kul, oo ay ka dhigto ciid.

Qashinka ka kooban khurdaarka iyo miraha, dooga, caleemaha, laamo/laamaha, carro nafaqeyayaasha iyo cuntada haraaga ah waa in lagu ridaa qashin qubka qashinka dabiiciga ah. Ha ku tuurin wax bac ah, bir ah ama quraarad qashin qubka qashinka dabiiciga ah.

Gelber Sack(Verpackungen) - Baako gelinta

Baako gelinta balastiga ah ama birta waxaa loo isticmaalaa in lagu warshadeeyo badeecooyin cusub. Tani waxay badbaadineysaa alaabaha cayriin iyo tamarta.

Baako gelinta faaruqa ah ee ka sameysan balastiga ama birta, iyo baako gelinta (kartoonada) loogu talagalay cabitaanka ama caanaha waxaa lagu ururiyay kiiska jaalaha ah ama baaldiga jaalaha ah.

Waraaqaha, kartoonada iyo dhalooyinka ha ku ridin jawaanka jaalaha ah/baaldiga jaalaha ah.

Altpapier- Warqada

Waraaqaha la siticmaalay waxaa loo isticmaalay in laga sameeyo kartoon ama waraaqo cusub.

Waraaqaha dib loo cusbooneysiin karo waxaa ku jira waraaqaha caadiga ah, wargeysyada, waraaqaha boorsooyinka iyo waraaqaha baakada. Hasayeeshee, warqadu waa inay noqoto nadiif.

Waraaqaha wasakhda ah, waraaqaha jikada, waraaqaha qoyan iyo warqadaha nadaafadu waa in lagu tuuraa qashinka haraaga ah ee *Restmüll*.

Restmüll- Qashinka haraaga ah

Qashinka haraaga ah looma isticmaali karo in lagu sameeyo badeecooyin cusub. Waa la gubayaa, oo tamarta waxaa loo isticmaalayaa in lagu abuurto kul iyo koronto.

Saxarada qashinka haraaga ah waxaa loogu talagalay sida xafaayadaha, waxyaabaha nadaafada dumarka loogu talagalay, warqada qoyan, maacuunta jabay, bahaca faakuyuumka, sigaarka, iwm.

Sunta iyo khashinka dhibaataada leh waa inaan lagu tuurin qashinka saxarada haraaga ah.

Altglas- Quraaradda

Quraaradaha la isticmaalay waxaa loo isticmaalaa in laga sameeyo dhalooyin cusub wax lagu shubto si loogu baakideeyo (sida. Dhalooyinka macaanka, dhalooyinka saliida olive).

Dhalooyinka faaruqa ah baakideynta ka sameysan quraaradu waa in lagu ridaa qashin qubka lagu ururiyo quraarada. Si loo hubiyo quraaradaha tayada sare leh, quraarada la isticmaalay waxaa loo kala saaraa midabadooda cadaan (nadiif), cagaar, iyo cawlaan.

Spezielle Abfälle - Qashinka gaar ah

Noocyada gaarka ah ee qashinka waa inaan lagu tuurin qashinka caadiga ah. Si aad u ogaato halka lagu tuuro qashinka sidan ah, la xiriir:

- Maamulada maxaliga ah
- Shirkaadaha qashinka (Dadka jarmalka ee la macaamila qashinka)
- Mulkiilaha gurigaaga ama daryeelaha guriga
- Jaararka iyo asxaabta yaqaan waxa la sameeyo

Qashinka Weyn:

Qashinka waaweyn waa in dib loo cusbooneysiyo oo dib loo isticmaalo ama lagubo si looga aburo tamar. Qashinka waaweyn waxaa loo gudbinayaa qashinka aadka u waaweyn ee sanduuqyada ama qashin qubayada (sida. Sariiraha shandadaha, roogaga, baaskiilada). Muhiim: laguuma oggola si fudud inaad ugu tuurto qashinka waaweyn meel ama aad gubo. Tani waa fal dambiyeed.

Korontada duuga ah:

Qalabyada korontada ah waxay ka koobayihin qalab qiimo leh, laakiin waxaa sidoo kale ku jira qalab waxyeelo leh. Qalabayada korontada ah ee Duuga ah ama jaba dib ayaa loo hagaajiyaa oo waxaa loo iibiyaa sida qalab la isticmaalay ahaan ama dib loo sameeyay, sidaa dartee qalabayada qiimaha leh ee ay ka koobanyihiin waxaa loo isticmaali karaa badeecooyin kale. Korontada duuga ah waxaa loo gudbinayaa badeecooyinka leh koorka korontada ama batariga (sida. shiidaha, telefishanka, moobeelka, qasaaladaha, mashiinka timaha).

Dharka duuga ah:

Dharka huudheydka ah midkood ama dib ayaa loo isticmaalaa ama waxaa laga dhigaa bustayaal iyo dhar. In sidaas la sameeyo waxay u aahantahay in la nadiifiyo oo la geliyo baako (lagu rido bac). Dharka duuga ah waxaa ku jira dharka la

isticmaalay, kabaha, bustayaasha iyo go'yaasha. Waxaa lagu uririyaa qashin qub qaar ah oo loogu talagalay dharka duuga ah.

Alaabta halista ah:

Sunta iyo qashinada halista waxaa looga ururinayaa si gaar aah noocyada kale ee qashinka ah si loo ilaaliyo banii aadamka– gaar ahaan carruurta – sidoo kale xayawaanka iyo dhirtaba. Alaabta halista ah waxaa laga heli karaa, tusale ahaan batriyada, laambadaha tamarta kaydiya iyo kiimakooyinka (sida. koolada, rinjiga, dhacaanada). Alaabta halista ah waxaa lagu aqoonsan karaa astaamaha digniinta iyo calaamadaha ku baakideysan.